

Xeer M. J. - 14 Sebtembar 1963, lamba. 21.

Sixid Xeer-Sharci 28 Luulyo 1962, lamba. 158

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu arkay qod 86 ee Dastuurka;

Markuu arkay Xeer-Sharci ee 12 Juun 1962, lamba. 3,
ee Xeerka Garsoorka;

Markuu arkay XM 28 Luulyo 1962 lamba.158 oo ah
Dixmo-tiiriso xeer lagu fuliyo xeerka garsoorka

Markuu garwaaqsaday in qaybta dambe ee faqradda afraad ee qod. 3 xeerka kor ku xusan oo sheegaayo garsoorayaasha tijaabada ku jiro waqtigaas, in lagu daro oo lagu meeleyo darajada Ku-xigeen Garsoore Gobol, ayadoo lagu xeraayo oo keliya natiijada imtixaanka kama dambeysta ee tababarka.

Markuu garwaaqsaday baahida loo qabo in laka cadeeyo, ayada oo laga fogaanayo hubaal la'aan in la dabaqo Degreetsda kor ku qoran, in darajada Ku-xigeen Garsoore Gobol ay la mid tahay darajada A/5 ee shaqaalaha rayidka ee dawladda sida laga dheehan karo lifaaqa Xeerka Garsoorka, Tabelaha "A".

Markuu dhageestay talada Golaha Wasiirrsda;

Markuu arkay soo jeedinta Wasiirka;

Garsoorka iyo Cadaaladda oo la tashaday Golaha Sare ee Garsoorka';

Wuxuu Xeeriyay

Qaybta dambe ee faqradda 4 ee qodobka 3 ee XM 28 Luulyo 1962 lamba. 158 waxaa loo bedelay sida soo socoto:

"Garsooraysashas ku jira tijaabada oo dallacsiintoodu ku xiran tahay natiijada imtixaanka kama dambeysta ah ee tababarka, waxaa sharci ahaan lagu meeleyn doonaa darajada Ku-xigeen Garsoore Gobol darajada A/5".

Muqdisho, 14 Sebtembar 1963.

Aden Cabdulle Cusman

Wasiirka Koowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarka

Wasiirka Garsoorka iyo Cadaaladda

Axmed Geele Xasan

Arkay ku diiwanqashan. Diiw. lamba. 3 warqadda lamba. 83

Hantidhowraha Guud: **Cali Axmed Daahir**